STARTS WITH one

Washington State Health Care Authority

Hay'adda Daryeelka Caafimaadka ee Gobolka Washington ayaa billoowday olole looga hortagayo xadgudubka Daawooyinka sharci darada ah (opioid). Olalaha waxaa loogu talagalay in lagu wargeliyo waxna lagu baro dadka reer Washington waxyaabaha khatarta leh ee laga dhaxlo haddii si xun loo isticmaalo daawooyinka dhakhtarka uu soo qoro iyo sidoo kale kor u qaadida keydinta, iyo qubista daawooyinka badbaadada leh.

Waxay ku bilaabmaysaa Hal Qorshe oo looga jawaabayo Warbaahinta Bulshada

Nidaam maamuleedka bulshada ee aalada Facebook. Tilmaamahaan waxaa laga soo qaatay Washington State Department of Social and Health Services (DSHS, Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobalka Washington) Fariintu waxay noqon kartaa mid qiyaasi karin kana baxsan sida laga filanaayo ololahaan billoowga ah.

Qorshe oo looga jawaabayo Warbaahinta Bulshadal

Joogtad ah
DH ayaa kormeeri doonta Bilaabidda hal guryo bulshadeed maalin kasta. Inta lagu jiro dhamaadka asbuuca, faallooyinka u baahan qarsoodinimada si dhakhso leh ayaa wax looga qaban doonaa, sidoo kale faallooyinka u baahan jawaab qoraal ah ayaa laga hadli doonaa maalinta ganacsiga ee xigta.

Xulashooyinka Jawaabta
DH ka jawaabi mayso faallooyinka guud illaa ay ku daraan faallooyin ama su'aalo macluumaad raadinaaya. Haddii faalladu tahay mid ku salaysan fariin dhiibasho, DH kama jawaabi doonto, maadaama ay u badan tahay inay keeneyso dood aan wanaagsanayn. Haddii faallooyinka ay ku jiraan macluumaad khaldan oo la xiriira farriinta, mowduucyada iyo xogta gaarka u ah Ololaha Bilaabidda Hal Olole, DH ayaa ka jawaabi doonta si loo caddeeyo macluumaadka khaldan. Haddii kale, DH kama jawaabi doonto fariimaha.

Marka DH hayso su'aalo ay ka jawaabayso, waxaan ku tiirsanaan doonaa khibrada HCA ee mawduuca si aan u qaabeyno jawaabta. Hoos waxaa kuqoran tusaalayaasha hore ee ku saabsan waxa aan ku jawaabi karno iyo waxa aanan ka jawaabeyn si aan horey ugu socono.

Comment Hiding Policy(Siyaasada Qarsoodiga Fariinta)
DH waxay qarin doontaa fariin kasta oo:

- Hanjawabaad u geysaneysa qof ama urur
- Isticmaalaysa luuqad aan wanaagsaneyn ama mid xadgudub ah
- Isticmaalaysa hadal niceyb ku salaysan

Fariimaha/Su'aalaha iyo Jawaabaha la filaayo

Kuwaani waa fariimo la filaayo iyo su'aalo, laakiin haddii kuwa kale ay soo baxaan oo aan la mid ahayn kuwaan, DH ayaa la shaqeyn doonta HCA si loo soo saaro jawaab la ansixiyay.

Su'aal: Waxaan u isticmaalaa daawooyinka sharci darad ah (opioids) xanuunkeyga joogtada ah mana la qabsan. Maxaan ugu baahanahay inaan fiiro gaar ah u yeesho arrintaan?

Jawaab: Daawooyinka Opioids waxay noqon karaan hab wax ku ool ah oo lagu daaweeyo xanuunka, laakiin sidoo kale waxay noqon karaan daawooyin lala qabsado. Waxaa jira dookhyo kale oo lagu maareyn karo xanuunada oo si wanaagsan xaalada qaar wax oga qaban kara lehna waxyeelooyin yaryar oo laga dhaxlo. Tixgeli inaad weydiiso daryeel bixiyahaaga caafimaadka arrimaha ku saabsan qaar ka mid ah xulashooyinkaas kale ee xanuunka lagu maareeyo. Haddii aad u isticmaasho daawada opioids-ka inaad aadna ku daaweyso xanuunka, xir oo u tuur si badbaado leh markaad dhameysato. Macluumaad dheeraad ah, booqo www.getthefactsrx.com.

Su'aal: Waxaad si badqab leh u xustay qufulka ama daadinta daawooyinkayga. Maxay ka dhigan tahay taas xaqiiqdii?

Jawaab: Qaar kamid ah tusaalooyinka wanaagsan ee meesha lagu xiraayo daawooyinkaaga waxaa kamid ah armaajooyinka xiran, kaydadka guriga, ama sanduuqyada gaar ah oo daawooyinka loogu talagalay lehna qufuL. Waxaa sidoo kale jira goobo laga helaayo sanduuqa wax lagu rido guud ahaan Gobolka Washington halkaas oo aad si ammaan ah ugu tuuri karto daawooyinka aan la isticmaalin. Si aad u hesho mid kuu dhaw, booqo www.takebackyourmeds.org.

Su'aal: Waxaan walaac ka qabaa saaxiib isticmaalaya daawooyinka opioids-ka.

Jawaab: Haddii aad leedahay saaxiib aad rumaysan tahay inuu si xun u adeegsanaayo daawooyinka opioids-ka, meesha ugu wanaagsan ee laga bilaabi karo waa khadka caawimaadda kasoo kabashada Gobolka Washington oo ah 1 (866) 789-1511. Waxaa jira wada hadal billoow ah webseedkeena ololaha, www.getthefactsrx.com, oo kaa caawin kara inaad la hadasho saaxiibkaa. Waxay nasiib ku leeyihiin inaad ku haystaan adiga.

Su'aal: Waan aqaanaa qof la qabsaday daawooyinka opioids-ka oo helay caawimaaddii uu u baahnaa. Laakiin xiligaan, ma garanaayo sida aan taageero u siin karo.

Jawaab: Maandooriyuhu wuxuu noqon karaa mid cabsi leh, laakiin waad saxantahay, waxaa jira barnaamijyo ka socda Gobolka Washington guud ahaan si loo caawiyo dadka la halgamaaya si xun isticmaalida daawooyinka opioid-ka iyo ku xadgudubka inay helaan taageerada ay u baahan yihiin. Qof kasta wuu kasoo kabsan karaa la qabsiga, waana muhiim inaad ku taageerto adigoo ogeysiinaaya inaysan kaligood aheyn oo had iyo jeer ay rajo jirto. Sidaad horeyba u aragtay, daaweyntu way shaqeysaa. Haddii adiga ama qof aad taqaanid u baahan yahay caawimaad, ka wac khadka caawimaadda ee soo kabashada Gobolka Washington taleefankaan 1 (866) 789-1511.

Su'aal: Maxay HCA iskugu dayeysaa inay noo sheegto sida loo barbaariyo carruurteena?

Jawaab: Waad ku mahadsan tahay fariintaada. Waxaan fahamsanahay in xiriir kasta oo waalid iyo mid ilmo uu ka duwan yahay oo aad adigu tahay qofka sida ugu wanaagsan u yaqaan ilmahaaga. Hadafkeenu waa inaan waalidiinta siino tallooyin iyo ilo si looga dhigo ka hadalka ku isticmaalka xun ee daawooyinka opioid-ka iyo xadgudubka dhalinyarada waaweyn. Halkaan waxaad ka helaysaa lifaaq kaa caawinayaa inaad billoowdo www.getthefactsrx.com/conversation-starters.

Su'aal: Miyaad isleedahay cunugaygu wuu dhageysan doonaa?

Jawaab: Adiga ayaa carruurtaada si wanaagsan u yaqaan, laakiin daraasaduhu waxay muujinayaan in carruurta ay boqolkiiba 50 u badan yihiin inaysan isticmaalin daawooyinka marka waalidku kala hadlo khataraha. Haddii aad rabto faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sida wada hadaladaan loola yeesho carruurtaada, booqo webseedkeena: www.getthefactsrx.com/conversation-starters.

Su'aal: Xashiishka ayaa badel wayn u noqon kara opioids.

Jawaab: Waxaa jira waxyaabo kale oo lagu baddeli karo daawada opioids-ka ee xanuunka. Mar kasta la tasho dhaqtarkaaga kahor inta aadan bilaabin daawooyinka kale ee aad ku maareyneyso xanuunka. Si aad u hesho badelka daawooyin kale oo dheeraad ah, booqo www.getthefactsrx.com/opioid-facts.

Su'aal: Tani waa dacaayad dawladeed oo keliya.

Jawaab: Waan ka xunahay inaad sidaan dareento. Macluumaadka loo adeegsaday ololahaan waxaa laga soo uruuriyay ilo lagu kalsoonaan karo. Gobolka Washington wuxuu hada la kulmayaa xadgudubka daawooyinka opioid-ka ah iyo dhibaato xad dhaaf ah oo ku lug leh daawada opioids-ka iyo maandooriyaha. Xaqiiqdii, opioids hadda waa mid ka mid ah sababaha ugu badan ee keena dhimashada la xiriirta dhaawaca Washington State (gobolka Washington.) Dad aad u badan ayaa u dhinta qaadashada qiyaasta xad dhaafka ah ee daawadan marka loo barbardhigo shilalka baabuurta. Marka la eego baaxadda arrintaan, gobolkeennu wuxuu kor u qaaday Qorshaha Shaqeynta ee Gobolka Washington ee Wadajirka ah ee loogu talagalay in lagu kordhiyo ilaha dadka degan Washington. Haddii aad jeclaan lahayd inaad hesho macluumaad badan oo ku saabsan ilaha loo isticmaalay ololahaan, fadlan booqo www.getthefactsrx.com/sources.

Su'aal: Tani waa caqli gal caadi ah. Maxay tahay sababta HCA ugu kharash gareyneyso canshuurteena ololahaan?

Jawaab: Gobolka Washington wuxuu hada la kulmayaa xadgudubka daawooyinka opioid-ka ah iyo sida xun ee loo isticmaalo. Wakaaladaha dowladda gobolka, waaxaha caafimaadka ee maxalliga ah, kooxaha xirfadleyda ah iyo ururrada bulshada ee guud ahaan Gobolka Washington ayaa loo xilsaaray in ay dadka deegaanka ka wacyi galiyaan halista isticmaalka xunxun ee opioid-ka iyo xadgudubyadiisa si loo yareeyo dhimashada la xiriirta opioid-ka. Qorshaha Shaqada ee Gobolka Washington ee sida Wadajirka ah wax looga qabanaayo Opioid-ka waa hal dariiqo oo wakaaladaha gobolka ay sidaan ku sameeyaan. Ololahaan gaarka ah waxaa maalgeliyay Health Care Authority (HCA, Laanta Daryeelka Caafimaadka).

Su'aal: Waxaan dhibsaday aragtida xayeysiinadaan / maxaad ii tusaysaan xayeysiintaan?

Jawaab: (Fariinta ahaan ayaan sida tooska ah ugu soo dirnaa qaybta fariimaha ee Facebook sidaa daradeed si guud uma dhiirigalinno caadadaan) - Waan ka xunnahay haddii aad dareento culeys. Wuxuu ku bilaabmayaa HAL mid oo ah olole kahortag ah oo ay wado Hay'ada Daryeelka Caafimaadka ee Gobolka Washington si loogu wacyi galiyo dadka reer Washington dhibaatada opioid-ka ee ka jirta gobolkeena. Taasi waa sababta laga yaabo inaad u aragto xayeysiinteena. Haddii aad jeclaan lahayd inaad qariso xayeysiintaan, dhagsii saddexda dhibcood ee cawlka ah ee kuyaala geeska kore ee midigta xayeysiista, kadibna dooro dookha "qari xayeysiista (hide ad)" oo aad ka helayso qaybta hoose.

Su'aal: Maxay sababta opioids-ka loola qabsanaayo?

Jawaab: Opioid-ka waxay si xun u saameyn kartaa xarunta ugu muhiimsan maskaxda, taasoo u horseedaysa dadka isticmaala inay u baahdaan waqti aad iyo aad u badan. Sidaad oowgeed, daawadu waxay noqon kartaa mid aad loola qabsado. Si aad macluumaad badan oo ku saabsan la qabsashada daawooyinka opioid u oggaato, booqo www.getthefactsrx.com/opioid-facts.

Su'aal: Ma garanaayo waxyaabaha ay kukala duwan yihiin daawada opioid-ka iyo daawooyinka kale ee xanuun baabi'iyaha ah.

Jawaab: Opioid-ka waa qayb kamid ah daawooyinka oo inta badan oo isticmaalo xakameynta xanuunka. Daawada darooga hiroowiin waxay kamid tahay opioid-ka, sida qaar badan oo ka mid ah daawooyinka xanuunka joojiya oo ay dhakhtaradu qoraan, oo ay ku jiraan oxycodone, hydrocodone, codeine, morphine, iyo kuwo kale oo badan. Opioid-ka waxay si xun u saameyn kartaa xarunta ugu muhiimsan maskaxda, taasoo u horseedaysa dadka isticmaala inay u baahdaan waqti aad iyo aad u badan. Sidaad oowgeed, daawadu waxay noqon kartaa mid aad loola qabsado. Si aad macluumaad badan u barato, booqo www.getthefactsrx.com/opioid-facts.